



SO

# *Faraha la iska qaado iyo eurodac*

Wabrixinta muwaadiniinta wadan sadexaad ama dadka aan waddan lahayn ee lagu helo inay si sharci darro ah ku joogeen waddan xubnaha ka mid ah, sida uu qabo qodabka 29(3) ee xeerka (eu) no 603/2013

Haddii lagugu helo inaad sharci darro ku joogitd wadan , ‘Dublin katirsan’<sup>1)</sup>, maamuladu waxay qaadi karaan farahaaga waxayna u gudbinayaan kaydka xogta ee la dhaho “Eurodac”. Ujeedada tan looga danleeyahay waxay tahay oo kaliya in la arko inaad horey magangalyo u dalbatay iyo inkale. Xogta farahaaga laguma kaydin doono kaydka xogta Eurodac, laakiin haddii aad horey magangalyo uga dalbatay wadan kale, waxaa dib laguugu diri karaa wadankaas.

Haddii farahaagu ay si cad u muuqan waayaan, oo ay ku jirto inaad si kas ah farahaaga dhaawac u gaarsiisay si aysan usoo bixin, mustaqbalka ayaa faraha lagaa qaadi doonaa.

Eurodac waxaa ku shaqeeya Haayadda Midowga Yurub ee la dhaho eu-LISA. Xogtaada waxaa kali ah oo loo siticmaali karaa ujeedooyinka uu sharcigu qeexay. Waxaa xogtaada heli kara oo kaliya Sistamka Dhexe ee Eurodac. Haddii aad mustaqbalka magangalyo ka codsato wadan kale oo Dublin katirsan, faraha lagaa qaado waxaa sidoo kale loo gudbin doonaa Eurodac. Xogta lagu kaydiyo Eurodac lalama wadaagi doono wadan kale ama urur ka baxsan EU iyo wadamada la xiriira.

- 
- 1) Waxay ku durugsantaaydhaamaan Midowga Yurub Ayrlandi (IE), Biljam (BE), Bolaandi (PL), Bulgeriya (BG), Danmarki (DK), Faransa (FR), Fiilaan (FI), Giriig (EL), Hangari (HU), Isbayn (ES), Isloofaakiya (SK), Isloofeeniya (SI), Istooniya (EE), Iswiidhan (SE), Jarnani (DE), Jeeg Ribablik (CZ), Karooshiya (HR), Khubras (CY), Laadfiya (LV), Laxanbargi (LX), Litu’aaniya (LT), Malta (MT), Nedarlandi (NL), Ostariya (AT), Purtaqiis (PT), Roomaaniya (RO), Talyaani (IT), Yunaytidh Kiingidhoom (UK), iyo sidoo kale 4ta wadan ee la « xiriirta » Xeerka Dublin Noorwey (NO), Ayslaandhi (IS), Iswiisarlaandhi (CH), iyo Lijtenistiin (LI)

©Midowga Yurub 2014

Dib usoosaaridda waa la ogalyahay. Wixii isticmaalid ah ama dib usoo saarid sawirada shakhsiga ah, waa in ogalaansho laga dalbadaa cidda tooska u leh xuquuqda daabacaadda.

## Warbixinta xiriirada

Aqoonsiga iyo macluumaadka meesha lagala xiriirayo ilaaliyaha Eurodac

### Waaxda Socdaalka ee hoos timaadda Wasaaradda Arimaha Gudaha

L. Sapiegos str. 1, 10312 Vilnius  
Tel: +370 5 271 7112  
Email: md.rastine@vrm.lt  
<http://www.migracija.lt>

Macluumaadka haayadda Kormeerista Maamulka Qaranka (Ilaalinta Xogta)

### Hay'adda Kormeerta Ilaalinta Xogta Qaranka

A. Juozapavičiaus str. 6, 09310 Vilnius  
Tel: +370 5 271 2804, +370 5 279 1445  
Email: ada@ada.lt  
<https://www.ada.lt>

**Haddii maamuladayada ay la noqoto in laga yaabo inaad wadan kale ka dalbatay magangalyo caalami ah kaasoo masuul ka noqon karay baadhista dalbashadaada, waxaad heli doontaa warbixin faahfaahsan oo ku saabsan nidaamka la raaci doono iyo sida ay u saamaynayso adiga iyo xuuuqahaaga.**



SO

*"Waxaan ku jiraa  
nidmaaka dublin  
– maxaa loola jeedaa?"*

B

Nidaamka dublin- warbixinta codsadayaasha magangalyada caalamiga sida uu qabo qodabka 4 ee xeerka (eu) Lambarkiisu yahay 604/2013

doi:10.2847/20836

ISBN 978-92-9243-166-2

